

# Ilmahaygu ma heli karaan tallaallo lacag la'aan ah ama qiimo jaban ah?

## FOOMKA ISBAARISTA BUKAANKA

Barnaamijka Minnesota Vaccines for Children, MnVFC (Tallaallada Carrurta ee Minnesota) wuxuu fidiyaa tallaallo lacag la'aan ah ama qiimo jaban carruurta 18 sano jirka ah iyo kuwa ka yar.

Calaamadee sanduuqa ku xiga qaybaha khuseeya ilmahaaga. Sii foomkan la buuxiyay dhakhtarkaaga ama rugtaada caafimaad. Kharashyada xafiis booqasho, kharashka siinta tallaalka, iyo ajuurada kale ee la xiriira ayaan bixin doonin barnaamijkan.

1.  **Ilmahaygu ma laha caymis caafimaad (ma laha caymis)**

*Ilmahaagu wuxuu uqalmaa MnVFC.*

2.  **Ilmahaygu wuxuu qaataa Barnaamij Daryeelka Caafimaadka Minnesota sida:**

- Medical Assistance
- MinnesotaCare
- Prepaid Medical Assistance Plan

*Ilmahaagu wuxuu uqalmaa MnVFC.*

3.  **Ilmahaygu waa Hindi Maraykan/Dhaladka Alaska**

*Ilmahaagu wuxuu uqalmaa MnVFC.*

4.  **Ilmahaygu wuxuu leeyahay caymis caafimaad gaar loo leeyahay oo caymiya kharashka tallaallada oo dhan, laakiin waxa laga yaabaa inaan bixiyo ka-goyn ka hor inta tallaalka aan la caymin.** (Haddii aadan hubin, waxaad tagtaa qaybta 5).

*Caymiskaaga ayaa horayba u caymiya kharashka tallaallada. Ilmahaagu uma qalmo MnVFC.*

5.  **Ilmahaygu wuxuu leeyahay caymis**

**caafimaad gaar loo leeyahay, laakiin ma aqaan haddi u caymiyo tallaallada.**

Wac shirkadda caymiskaaga adiga oo isticmaalaya lambarka ku yaal dhabarka kaarka caymiska. Weyddii haddii u qorshahaagu ku beegan yahay qaybaha hoos ku yaal.

- Ma caymiyo mid ama in ka badan talaallada. *Ugu qalma MnVFC tallalada aan-caynsanayn kaliya rugta caafimaadka dadwaynaha\*.*

- Adeegyada ka hortagga Caps (Adeegyada kahortagga tacaddiga ilmaha) illaa heer xaddi.

*Marka heerka xaddigaas la gaaro, ilmahaaga ayaa ugu qalma MnVFC rugta caafimaadka dadwaynaha\*.*

- Wuxuu caymiyaa kharashka tallaallada oo dhan, laakiin waa in la bixiyaa ka-goyn ka hor intaan tallaalka la bixin. *Caymiskaaga ayaa horayba u caymiya kharashka tallaallada. Ilmahaagu uma qalmo MnVFC.*

\* Ilmahaagu wuxuu ugu qalmaa tallaallo lacag la'aan ama lacag jaban ah xarumahan caafimaad dadwayne: xarumaha caafimaadka dadwaynaha deegaanka (local public health clinics, LPH), Xarumaha Caafimaad ee ka Fasaxan Dowladda Federaalka (Federally Qualified Health Centers, FQHC), Xarumaha Caafimaadka Miyiga (Rural Health Centers, RHC), Adeegga Caafimaadka Hindida (Indian Health Service, IHS), iyo xarumaha caafimaadka qabiileed.

Minnesota Department of Health  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164  
651-201-5522  
[health.mnvfc@state.mn.us](mailto:health.mnvfc@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us/vfc](http://www.health.state.mn.us/vfc)

4/19/23 (Somali)

Si aad xogtan u hesho qaab ka duwan, wac: 651-201-5522 or 1-800-657-3970.